



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 13aad
Taariikhda: 10/1/2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:20 AM	Saacadda uu Xirmay: 11:55 AM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: 1.Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka XFS Dr Cali Xaaji Aadan. 2. Xubno ka socoday Xafiska Hanti-dhowrka Qaranka.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhriinta Ayadaha Qur'aanka. 2. Ansaxinta ajendaha. 3. Akhrinta 1 ^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Daawada. 4. Akhrinta 2 ^{aad} ee Hindise sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaran.

Furitaanka Kulanka:

Senator Cabdixakin Macalin Axmed ayaa akhriyey Aayadaha Qur`aanka ee kulanka lagu furay

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka XFS Mudane Cali Xaaji Aadam si uu Golaha uga hor akhriyo warbixin ku saabsan akhrinta 1^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Daawada. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Senator Ibraahim Aw-gaab Cismaan, si uu Golaha uga hor akhriyo warbixin ku saabsan akhrinta 2^{aad} ee Hindise sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaran. Warbixinta kaddib, 4 Senator ayaa dood iyo soojeedin ka yeeshay Hindise sharciyeedka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray maamulka Golaha in Hindise-sharciyeedka Daawada loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.
3. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdulaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **11:55 AM**.

DHAMMAAD